

JAMHUURIYADDA
SOMALILAND



REPUBLIC OF SOMALILAND
جمهورية صوماليلاند

XAFIISKA MADAXWEYNAHA
OFFICE OF THE PRESIDENT

مكتب الرئيس

Tix; JSL/XM/WM/222-279/072026

Taariikh: 06/07/2026

WAREEGTO MADAXWEYNE

Dhaqan-galka Wax-ka-baddelka iyo Kaasbista Xeerka Hay'adda Maaraynta
Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka (NADFOR), Xeer Lr; 35/2026

Markii aan arkay: Qoddobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markii aan arkay: Qodobada 75aad iyo 76aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markii aan helay: Go'aanka Golaha Wakiillada ee Ansixinta Wax-ka-beddelka
iyo kaabista Xeerka Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo
Keydka Raashinka Qaranka (NADFOR), Xeer Lr; 35/2026.
(Go'aan Lr. GW/KF-14/16/11/2026), summadiisunta tahay
GW/G/12/201/2026, kuna taariikheysan 24/06/2026.

Waxa aan Soo-saaray:

Wareegtadan oo lagu dhaqan-gelinayo laguna faafinayo Wax-ka-baddelka iyo Kaasbista
Xeerka Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka (NADFOR)
Xeer Lr; 35/2026.

ALLAA MAHAD LEH

Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillaahi (Cirro)
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland





Ujeedo: Ansixinta Soo jeedinta M/Waynaha ee Wax ka beddelka iyo Kaabista Xeerka Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka (NADFOR)

Xeer Lr. 35/2026

GOLAHA WAKIILLADU

- Markuu Arkay:** Qodobada 18aad, 39aad iyo 90aad, 113aad, 114aad, 12aad ee Dastuurka.
- Markuu Tixgaliyay** Baahida loo qabo in wax ka beddelka iyo dib u habaynta Xeer Lr. 35/2006 ee abuurista Hay'adda Cilmibaadhista Badbaadinta Deegaanka Iyo U Diyaargarawga Aafooyinka oo noqotay imika Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka (NADFOR).
- Markuu ogaaday:** Baahida loo qabo badbaadinta deegaanka iyo u diyaargawga aafooyinka iyo abuuridda hay'ad u xilsaaran keydka raashinka Qaranka.
- Markuu Arkay:** Soo jeedinta xukuumadda ee wax ka beddelka iyo kaabista Xeerka Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka & Keydka Raashinka Qaranka (NADFOR).
- Markuu dhagaystay:** Warbixinta guddida kheyraadka dabiiciga iyo deegaanka ee Golaha, isla markaana Goluhu dood ka yeeshay dib u habaynta Xeerka.
- Markuu u Codeeyay:** **Soo jeedinta M/waynaha ee Wax ka beddelka iyo Kaabista Xeerka Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka (NADFOR),** kalfadhigii 14aad fadhigiisi 11aad ee Golaha Wakiilada kuna taariikhaysna **20/06/2026** oo ay Goob joog ahaayeen **(63)** Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha Golaha Wakiilada.



WUXUU

Cod aqlabiyad ah **(53 cod)** oo gacan taag ah ku Ansixiyay Wax Ka Beddelka Iyo Kaabista Xeerka Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka Iyo Keydka Raashinka Qaranka **(NADFOR) Xeer Ir.35/2026.**

ALLAA MAHAD LEH

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL




Md. Yaasiin Maxamuud Xiir (Faratoon)
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL



JAMHUURIYADDA SOMALILAND

GOLAHA WAKIILLADA



**Xeerka Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Keydka
Raashinka Qaranka (NADFOR).**

Xeer Lr 35/2026





Contents

QAYBTA 1AAD	4
QODOBBO GUUD	5
Qodobka 1aad	5
Magaca Xeerka	5
Qodobka 2aad	5
Erey bixin	5
Qodobka 3aad	7
Ujeeddooyinka Xeerka	7
Qodobka 4aad	7
QAYBTA 2AAD	8
HAY'ADDA MAARAYNTA MASIIBOYINKA IYO KEYDKA RAASHINKA QARANKA	8
Qodobka 5aad	8
Aasaasidda Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka	8
Qodobka 6aad	8
Xilgudashada Hay'adda	8
Qodobka 7aad	9
Xilka iyo Waajibaadka Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka	9
Qodobka 8aad:	11
Guddida Qaran ee Maaraynta Masiibooyinka (GQMM)	11
Qodobka 9aad	11
Qodobka 10aad Fadhiyada Guddida	12
QAYBTA 3AAD	13
QAABDHISMEEDKA HAY'ADDA MAARAYNTA MASIIBOYINKA IYO KEYDKA RAASHINKA QARANKA	13
Qodobka 11aad	13
Qaabdhismeedka Hay'adda	13
Qodobka 12aad	13
Magacaabidda iyo Xil ka Qaadidda Guddoomiyaha & Guddoomiye ku xigeenka Hay'adda	13
Qodobka 13aad	13
Shuruudaha Magacaabista Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeenka Hay'adda	13
Qodobka 14aad	14





Shuruudaha Xil ka Qaadista Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeenka Hay'adda	14
Qodobka 15aad	14
Xilka & Waajibaadka Guddoomiyaha Hay'adda	14
Qodobka 16aad	15
Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiye ku xigeenka Hay'adda	15
Qodobka 17aad	16
Shaqaalaha Hay'adda	16
QAYBTA 4AAD	16
MAALIYADDA IYO HAB XISAABEEDKA	16
Qodobka 18aad	16
Miisaaniyadda Hay'adda	16
Qodobka 19aad	16
Xisaabaadka iyo Hantidhawrka Hay'adda	16
Qodobka 20aad	17
Warbixinaha	17
QAYBTA 5AAD	17
QODOBBO KALA DUWAN	17
Qodabka 22aad	17
Soo Saaridda Xeernidaamiyayaasha	17
Qodobka 23aad	18
Tirtirid ama laalid (Repealing)	18
Qodabka 24aad	18
Dhaqangalka Xeerka	18





Jamhuuriyadda Somaliland

GOLAHA WAKIILLADU

- Markuu Arkay:** Qodobada 18aad, 39aad iyo 90aad, 113aad, 14aad, 12aad ee Dastuurka.
- Markuu Tixgaliyay -** Baahida loo qabo in wax ka beddelka iyo dib u habaynta Xeer Lr. 35/2006 ee abuurista Hay'adda Cilmibaadhista Badbaadinta Deegaanka Iyo U Diyaargarawga Aafooyinka oo noqotay imika Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka (NADFOR).
- Markuu ogaaday** Baahida loo qabo badbaadinta deegaanka iyo u diyaargawga aafooyinka iyo abuuridda hay'ad u xilsaaran keydka raashinka Qaranka.
- Markuu Arkay:** Soo jeedinta xukuumadda ee wax ka bedelka iyo kaabista Xeerka Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka & Keydka Raashinka Qaranka (NADFOR).
- Markuu dhagaystay** Warbixinta guddida kheyraadka dabiiciga iyo deegaanka ee Golaha, isla markaana Goluhu dood ka yeeshay dib u habaynta Xeerka.

Wuxuu ansixiyay

Wax ka beddelka iyo Kaabista Xeerka Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka (NADFOR)

Xeer Lr; 35/2026





QAYBTA 1AAD

QODOBBO GUUD

Qodobka 1aad

Magaca Xeerka;

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa wax ka beddelka iyo kaabista Xeerka Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka (NADFOR) Xeer Lr 35/2026.

Qodobka 2aad

Erey bixin

Haddii aan si kale nuxurku u sheegin, ereyadan waxa loola jeedaa:

Aafo:

Waxa loola jeedaa xaalad ba'an oo ka dhalata dhacdo dhibaato culus oo dabiici ah ama mid aadami sameeyay ah oo ku habsata bulsho, carqaladaysana nolol maalmeedkooda, gaadhsiisana bulshadu inay awooddi waayaan in ay helaan cunto iyo baahiyahooda kale ee aasaasiga ah, isla markaana hanan kari waayaan noloshooda iyagoon helin gargaar iyo mucaawimo kale.

Barnaamijka Kaalmada: -

Waxa loola jeedaa keenidda, qaybinta cuntada iyo alaabta kale ee lagama maarmaanka ah u ah nolosha, helitaanka biyo nadiif ah oo la cabo, taageerida dhinaca caafimaadka, ka hortagga daranyada hantida miyi iyo magaalaba, taageerada hawlaha lagu horumarinaayo dhaqaalaha, dib u habaynta qodaalka beeraha, dejinta deegaanka iyo ilaalinta bii'adda, waxa kale oo ka mid ah qaadidda talaabooyin wax ka taraya abaaraha iyo hab cilmiyeed abuuri kara fursado shaqo.





Gargaarka Aan Cuntada Ahayn: Waxa loola jeedaa qalabka baadhidda iyo samatabixinta, agabka hoyga, weelka cuntada, qalabka keydinta biyaha, daawooyinka, saadka iyo agab kasta oo kale oo ka qayb qaadanaya ka hortagga iyo yaraynta waxyeelada ay keenaan Masiibooyinka iyo xaaladaha degdegga ahi.

Guddida: waxa loola jeedaa Guddiga Qaranka ee Maaraynta Iyo U Diyaar Garowga Masiibooyinka.

Guddoomiye: Waxa loola jeedaa Gudoomiyaha Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka.

Hay'add: Waxa loola jeedaa Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka Keydka Raashinka Qaranka.

Ka hortagga: Waxa loola jeedaa hawlaha iyo tallaabooyinka la qaadayo si looga hortago saamaynta Masiibooyinka iyo xaaladaha degdegga ah.

Ka jawaabidda: Waxa loola jeedaa tallaabooyinka la qaadayo ka hor, inta lagu jiro ama isla markiiba kaddib masiibada si loo badbaadiyo nolosha, loona yareeyo saamaynta aafada, loona hubiyo badbaadada dadweynaha iyo daboolidda baahiyaha aasaasiga ah ee dadka ay saameysay.

Keydka Raashinka Qaranka: Waxa loola jeeda keydka loogu talo galay in lagu hayo gargaarka cuntada ah iyo ka aan cuntada ahayn, si loo xaqiijiyo in la helo gargaarka loo baahan yahay waqtiga cunto yaraanta iyo waqtiga xaaladaha masiibooyinka.

U diyaargarowga: Waxa loola jeedaa xaaladda u diyaarsanaanta dawladda ee odorosidda, wax ka qabashada, ka jawaabidda iyo kasoo kabashada saamaynta masiibooyinka iyo xaaladaha degdegga ah.





Yaraynta:

Waxa loola jeedaa tallaabooyinka loogu talagalay in lagu dhimo khatarta, saamaynta masiibooyinka iyo xaaladaha degdegga ah.

NADFOR:

Waxa loola jeedaa Hay'adda u Diyaargarowga Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka.

Qodobka 3aad

Ujeeddooyinka Xeerka

Ujeeddooyinka xeerka waxa ka mid ah:

- 1) In kor loo qaado hawlaha u diyaar garowga, maaraynta masiibooyinka iyo in la aburo keydka raashinka Qaranka.
- 2) In la dhiso qaabdhismeed hufan oo lagu maareeyo hawlaha maamulka, ka hortagga iyo u diyaargarowga masiibooyinka.
- 3) In kor loo qaado awoodda hay'adda si ay si hufan ugu maareeyso saameynta masiibooyinka, xaaladaha degdegga ah iyo in la qaado tallaabo kasta oo lagama maarmaan ah si looga hortago ama loo yareeyo khataraha nolosha, hantida iyo deegaanka ee ka imaanaya masiibooyinka dabiiciga ah iyo xaaladaha degdegga ah.
- 4) In la hirgeliyo habab lagu yaraynayo khataraha keeni kara, gacan ka geysan kara ama uga sii dari kara xaaladaha masiibooyinka dabiiciga ah.
- 5) In la ilaaliyo heerka ugu wanaagsan ee kaydka cuntada qaranka si wax looga qabto cunto yarida loogana jawaabo baahiyaha cuntada degdega ah.
- 6) In kor loo qaado adeegyada hay'adda ee la xidhiidha hawlaha maamulka iyo hirgelinta keydka raashinka Qaranka oo casri ah, islamarkaana daboolo helitaanka raashin ku filan waqtiyada cunto yarida iyo waqtiyada ka jawaabidda hawlaha gargaarka degdegga ah.
- 7) In kor loo qaado cilmibaadhista iyo tegnoolajiyadda si loo helo xalal waara oo lagu maareyn karo masiibooyinka.
- 8) In la sameeyo barnaamijyo wacyigelin iyo tababarro si bulshada loo fahamsiiyo muhiimadda diyaargarowga masiibooyinka.

Qodobka 4aad

Xadka Dabbaqaadda Xeerka

1. Xeerkan waxa lagu dabbaqayaa dhammaan hawlaha lagu maareynayo masiibooyinka oo ay ku jiraan qorsheynta, jawaabcelinta, ka soo kabashada iyo





yaraynta saamaynta masiibooyinka dabiiciga ah ama kuwo uu bini'aadamku sababay.

2. Waxa uu xeerkan si gaar ah u nidaaminayaa habka loo diyaariyo loona maareeyo keydka raashinka Qaranka oo ay ku jiraan dejinta qorshe keydinta, ilaalinta iyo dib u cusboonaysiinta keydka, si waafaqsan baahiyaha shacabka.
3. Xeerkan wuxuu khuseeyaa dhammaan hay'adaha dawladda, kuwa gaarka loo leeyahay iyo maamulka dawladda hoose ee degmooyinka iyo maamulka gobollada ee ku hawlan maaraynta masiibooyinka iyo raashinka Qaranka, iyadoo si gaar ah diiradda loo saaraayo wada shaqaynta iyo isku xidhka hay'adahaas.

QAYBTA 2AAD

HAY'ADDA MAARAYNTA MASIIBOYINKA IYO KEYDKA RAASHINKA QARANKA

Qodobka 5aad

Aasaasidda Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka

- 1) Xeerkan waxa lagu aasaasay Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka & Keydka Raashinka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo ah hay'ad dawli ah oo u xilsaaran hawlaha maamulka, maaraynta, ka hortagga iyo u diyaargarowga masiibooyinka iyo sidoo kale hawlaha maamulka keydka raashinka Qaranka, si waafaqsan qodobbada xeerkan iyo xeerarka kale ee khuseeya.
- 2) Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland waxay yeelanaysaa jiritaan qaanuuni ah, astaan iyo shaambad u gaar ah, waxayna ku gali kartaa heshiis, kuna dacwayn kartaa ama lagu dacwayn karaa magaceeda.
- 3) Hay'addu waxay si madax bannaan u gudanaysaa waajibaadkeeda, iyadoo raacaysa qodobbada xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka u degsan.
- 4) Si ay hay'addu u fuliso waajibaadkeeda, waxay lahaan kartaa hanti guurto iyo mid ma'guurto ah oo ay si sharci ah ugu adeegto danaha Qaranka.
- 5) Xarunta dhexe ee hay'addu waxay ku taallaa caasimadda Jamhuuriyadda Somaliland ee Hargeysa, iyadoo laamo ka furan karta gobollada dalka, si loo gaadhsiiyo adeegyada guud ee loo igmaday.

Qodobka 6aad

Xilgudashada Hay'adda

Xil gudashada Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka waxa saldhig u ah shareecadda Islaamka, Dastuurka JSL, xeerkan iyo





Qodobka 7aad

Xilka iyo Waajibaadka Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka

Xilka iyo waajibaadka Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka & Keydka Raashinka Qaranku waa:

- 1) Diyaarinta siyaasadda Qaranka ee ka hortagga iyo u diyaargarowga Masiibooyinka Dabiiciga ah iyo xaaladaha degdega ah ee la xidhiidha maaraynta masiibooyinka iyadoo la kaashanaysa hay'addaha kale ee ay khusayso.
- 2) Daraasaynta meelaha hore ay masiibooyinku ugu dhaceen si loo dejiyo istraatiijiyadda lagaga hor tegayo masiibooyinka mustaqbalka.
- 3) Maamulidda sanduuqa dhaqaale ee ka hortagga iyo u diyaargarowga masiibooyinka
- 4) Hay'addu iyadoo kaashanaysa laamaha ku lug leh, inay ku samayso daraasadda ugu habboon, sababaha dhaliya masiibada iyo samaynta hab digniin bixineed.
- 5) Hay'addu iyadoo fulinaysa tilmaaha go'aanka guddida, waxay ku dhawaaqaysaa cadaynaysaana qaybaha dalka ee aafadu ka dhacday, si loo ogoaado baaxadeed.
- 6) Hay'addi iyadoo raacaysa tilmaamaha Gudidda heer qaran ee maaraynta masiibooyinka, waxa ay ka heli kartaa kaalmooyinka gudaha iyo dibadda. Kuwaasi oo la xidhiidha hawlaha maaraynta masiibooyinka iyo xaaladaha degdega ah.
- 7) Diwaan galinta nooc kasta oo kaalmo deeq ah oo laga helo deeq bixiyayaasha iyo hay'adaha samafalka gudaha iyo dibaddaba.
- 8) Isu-duwidda hawlaha gargaarka ee la xidhiidha xaaladaha masiibooyinka dabiiciga ah, iyadoo iskaashi iyo wada shaqayn kala yeelanaysa Wasaarada Dibd u dejinta iyo Arrimaha Bani'aadannimada hawlaha la xidhiidha isuduwidada gargaarka bani'aadannimada ee la gaadhsiinayo dadka ku nool goobaha barakacayaasha iyo dadka qaxootiga ah, si waafaqsan qorshayaasha iyo tilmaaha guddida qaran ee maaraynta masiibooyinka.
- 9) Inay ka hawlgasho hawlaha dedejin kara gaadhitaanka ujeeddooyinkooda.
- 10) Samaynta hab digniin bixineed iyo hab isgaadhsiineed oo xidhiidhiya dalka oo dhan (gobol, degmo iyo tuulo.)
- 11) Ururinta, Lafaguridda, iskudubaridka iyo faafinta xogaha digniin bixineed.
- 12) Diyaarinta iyo iskudubaridka hawlaha maaraynta iyo u diyaargarowga masiibooyinka.
- 13) Kala talinta hay'adaha dawladda tallaabooyinka maaraynta iyo u diyaargarowga masiibooyinka ee khuseeya.
- 14) Kormeeridda iyo qiimaynta hawlaha maaraynta masiibooyinka iyo





dabiiciga ah, iyadoo la khaashanaysa ha'addaha kale ee ay khusayso, iyo diiwaangalinta casharada laga bartay maaraynta masiibooyinka si loo hormariyo tallaabooyinka ka hortaggal ka jawaabida iyo u diyaar-garowga masiibooyinka.

- 15) Maamulidda iyo dhisidda bakhaarada keydka raashinka Qaranka.
- 16) Helidda iyo ka guddoomidda qaadhaan bixiyayaasha gargaarka cuntada iyo alaabooyinka ee aan cuntada ahayn ee loogu deeqo hawlaha samatabixinta masiibooyinka.
- 17) Keydinta, qaybinta gargaarka cuntada iyo alaabooyinka aan cuntada ahayn ee loogu talagalay xaaladaha masiibooyinka dabiiciga ah, iyadoo raacaysa qorshaynta iyo tilmaamaha guddida qaran ee maaraynta masiibooyinka.
- 18) Helitaanka sunta cayayaanka iyo kiimikooyinka lagama maarmaanka ah ee loo baahan yahay, si looga hortago cayayaanka ku dhalan kara raashinka keydka qaranka ama isbeddelka ku iman kara raashinka la keydiyo muddo dheer iyo hirgelinta habka hubinta tayada keydka raashinka Qaranka.
- 19) Ilaalinta tayada raashinka soo galaya ama laga saarayo keydka raashinka Qaranka iyo ka ilaalinta raashinka iyo agabka aan raashinka ahayn ee aan buuxin heerarka tayada in ay soo galaan keydka.
- 20) Diwaangelinta dadka ay saameeyeen masiibooyinku iyo u qaybinta hay'adaha gargaarka iyo kaalmooyinka kale ee lagu taakulaynayo dadka aafadu saamaysay.
- 21) La socodka iyo kormeeridda badqabka raashinka loo qaybinayo dadka masiibooyinku saameeyeen.
- 22) Iskudubbaridka, dabagalka iyo qiimaynta barnaamijyada yaraynta iyo wax ka qabashada dhibaatooyinka dadka ay waxyeelleeyeen masiibooyinku.
- 23) Diyaarinta qorshayaasha gargaarka degdega ah ee la xidhiidha xaaladaha masiibooyinka dabiiciga ah ee la gaadhsiinayo dadka ay saameeyeen masiibooyinku. Dadkaas ooh ab-nololeedkoodii meesha ka baxay sida xoolihii iyo wax-soosaarkii beeruhu, una baahan in la gaadhsiiyo gargaar degdeg ah.
- 24) Maamulidda iyo fulinta siyaasadaha iyo qorshayaasha iyo barnaamijyada la xidhiidha maaraynta masiibooyinka masiibooyinka dabiiciga ah iyo gargaarka a ah ee la gaadhsiinayo bulshada ay saameeyeen masiibooyinku, si waafaqsan siyaasadaha iyo qorshayaasha guddida qaran ee maaraynta masiibooyinka
- 25) Xaqiijinta in qorshayaasha gargaarka degdega oo loo fulinayo bulshada ay saameeyeen masiibooyinka dabiiciga ahi ay noqdaan kuwo ku jihaysan badbaadinta nolosha iyo dib-u-soo-kabasho degdeg ah, si aanay u abuurin ku tiirsanaan joogto ah oo caqabad ku noqon karta nolosha bulshada iyo wax soo





- 26) Samaynta wacyigelin guud, tababarro iyo barnaamijyo waxbarasho oo khuseeya maaraynta masiibooyinka, iyo u diyaargarowga xaaladah degdegga ah, iyadoo kala kaashanaysa dawlada iyo kuwa caalamiga ah ee ay khusayso.

Qodobka 8aad

Guddida Qaran ee Maaraynta Masiibooyinka (GQMM)

1. Waxa xeerkan lagu dhisay Guddida Qaran ee Maaraynta Masiibooyinka (GQMM) oo ka kooban:-
 - b) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland (Guddoomiye) ama cida uu u magacaabo in ay guddoomiso guddida.
 - t) Guddoomiyaha Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka & Keydka Raashinka Qaranka (NADFOR) oo ah Xoghayaha Guud ee Guddida.
 - j) Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Beeraha.
 - x) Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka.
 - Kh) Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
 - d) Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka.
 - r) Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Biyaha.
 - s) Wasiirka Wasaaradda Xannanada Xoolaha iyo Horumarinta Reermiyiga
 - Sh) Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada.
 - Dh) Wasiirka Wasaarada Dib-u-dejinta iyo Arrimaha Bani'aadannimada
 - c) Laba xubnood oo ka kala tirsan labada Gole ee Baarlamaanka (Guurtida iyo Wakiillada) oo kala ah guddoomiyayaasha guddiyada Khayraadka
 - g) Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga
 - f) Xubin Culimada dalka laga soo xulo
2. Xubnaha Guddida Qaran ee Maaraynta Masiibooyinka waxa lagu magacaabayaa digreeto uu soo saaro Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.

Qodobka 9aad

Awoodaha Xilka iyo Waajibaadka Guddida

Awoodaha iyo waajibaadka guddida Qaranka ee Masiibooyinka waxa ka mid ah:

1. Ku dhawaaqidda masiibooyinka guud ahaan qaranka, iyadoo loo marayo hab sharci ah oo cad, saamaynta guud ahaan qaranka, iyadoo loo marayo hab sharci ah oo cad.
2. Isku dubbaridka iyo fududeynta ururinta qaadhaanka gudaha iyo dibadda, iyadoo si gaar ah loo xoojinayo wada shaqaynta hay'adaha caalamiga ah, ururrada bulshada rayidka ah iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay, si loo caawiyo dadka ay masiibadu saamaysay.
3. Iskuduwidda iyo maaraynta gargaarka degdegga ah, markay masiibooyinku





hay'adaha caalamiga ah.

4. Xaqiijinta iyo dhiirrigelinta barnaamijyada yaraynta halista masiibooyinka (DRR), si meesha looga saaro sababaha dhaliya masiibooyinka, iyadoo la xoojinayo wacyigelinta bulshada iyo kobcinta qorshayaasha ka hortagga masiibooyinka.
5. Bixinta tilmaamaha guud ee ku saabsan hirgelinta siyaasadda iyo istaraatiijiyadda maaraynta iyo u diyaargarowga masiibooyinka Qaranka, iyadoo la hubinayo in nidaamyadu ay waafaqsan yihiin heerarka caalamiga ah.
6. Eegista iyo dibuhabaynta miisaaniyadda Qaranka, iyadoo lagu salaynayo baaxadda masiibada, si loo helo kheyraadka loo baahan yahay ee lagaga jawaabayo xaaladaha degdegga ah.
7. Xoojinta habka xog ururinta iyo falanqaynta macluumaadka la xidhiidha masiibooyinka, si loo horumariyo qorshayaasha ku aaddan ka jawaabidda iyo u diyaargarowga masiibooyinka mustaqbalka.
8. Kordhinta awoodda iyo tababaridda shaqaalaha guddida, si ay ugu diyaar garoobaan hawl-gallada masiibooyinka baaxadda leh, iyagoo adeegsanaya farsamooyin casri ah.
9. Samaynta iskaashi joogto ah oo lala yeesho dawladaha gobollada, si loo xaqiijiyo qorshe wadajir ah oo loo fuliyo maaraynta masiibooyinka.
10. Kormeeridda iyo fulinta hawlaha masiibooyinka, waxayna xaq u leeyihiin inay dalbadaan warbixinno, isla markaana soo saaraan warbixin sanadle ah, iyagoo hubinaya in gargaarka loo bixiyo si hufan, caddaalad ah, isla markaana la ilaaliyo xuquuqda iyo karaamada muwaaddiniinta ay masiibooyinku saameeyeen.

Qodobka 10aad

Fadhiyada Guddida

1. Fadhiyada caadiga ah ee guddida waxa la qabanayaa ugu yaraan saddex jeer sannadkii, iyadoo jadwalka fadhiyada lagu ansixinayo kulanka ugu horreeya ee sannad kasta iyo kuwo aan caadi ahayn, haddii loo baahdo.
2. Fadhiyada aan caadiga ahayn waxa lagu qaban karaa iyadoo loo cuskanayo xaaladaha degdegga ah, waxaana soo jeedin kara:
 - b) Guddoomiyaha guddida.
 - t) Ugu yaraan saddex xubnood oo ka mid ah guddida, kuwaas oo soo gudbiya dalab qoraal ah oo sababaysan.
3. Qabsoomidda fadhiyada guddida waxay dhacaysaa markay soo xaadiraan ugu yaraan laba meelood meel (quorum), balse si buuxda waa inay joogaan 50% +1 xubnaha guddida si go'aannada loo ansixiyo.
4. Guddoominta fadhiyada guddida waxa maamuli doona guddoomiyaha guddida, haddii uu maqan yahayna waxa guddoomin doona ku xigeenka.
5. Ansixinta go'aannada guddidu waxay ku xidhan yihiin cod hal dheeri ah, haddii codadka xubnuhu is le'ekaadaan, guddoomiyaha ayaa leh cod dheeraad ah (casting vote) si go'aan loo gaadho.
6. Waxa loo oggolaanayaa in fadhiyada aan caadiga ahayn lagu qabto qaab toos ah (online ah, hab farsamo oo casri ah) haddii loo baahdo, gaar ahaan xaaladaha degdegga ah ama haddii masiibooyin baaxad leh ay jiraan.





7. Xusuusqor rasmi ah oo ku saabsan ajendayaasha, doodaha iyo go'aannada la gaadhay waa in la diyaariyaa, loona qaybiyo dhammaan xubnaha guddida fadhiga kaddib muddo aan ka badnayn 7 maalmood.
8. Dhammaan fadhiyada waa in lagu qabtaa, si waafaqsan xeerarka guddida, iyadoo la hubinaayo in xubnaha ay soo gudbiyaan tabashooyinka ama caqabadaha haysta guddida, haddii ay jiraan.

QAYBTA 3AAD

QAABDHISMEEDKA HAY'ADDA MAARAYNTA MASIIBOYINKA IYO KEYDKA RAASHINKA QARANKA

Qodobka 11aad

Qaabdhismeedka Hay'adda

Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranku waxay yeelanaysaa Qaabdhismeed ka kooban:

- 1) Guddoomiye
- 2) Guddoomiye ku xigeenka hay'adda.
- 3) Waaxyaha
- 4) Xafiisyada gobollada
- 5) Shaqaale waynaha

Qodobka 12aad

Magacaabidda iyo Xil ka Qaadidda Guddoomiyaha & Guddoomiye ku xigeen Hay'adda

- 1) Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeenka Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka waxa magacaabaya Madaxweynaha JSL, waxaana cod hal dheeri ah ku ansixinaya Golaha Wakiillada.
- 2) Guddoomiyaha & Guddoomiye ku xigeenka Hay'adda waxa xilka ka qaadi kara oo kaliya Madaxweynaha JSL.

Qodobka 13aad

Shuruudaha Magacaabista Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku Xigeenka Hay'adda

Shuruudaha looga baahan yahay guddoomiyaha iyo guddoomiye ku xigeenka Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranku waa in ay yihiin muwaaddiniin reer Somaliland ah.





2. Waa inay haystaan aqoon waxbarasho heer jaamacadeed ah, ugu yaraan shahaadada darajada koowaad (Bachelor Degree), iyadoo mudnaan gaar ah la siinaayo kuwa haysta cilmiyada la xidhiidha, maaraynta masiibooyinka, maamulka iyo hoggaaminta, culuunta bulshada ama xidhiidhka caalamiga ah, culuunta deeganka iyo isbeddelka cimilada.
3. Waa inay leeyihiin waayo'aragnimo shaqo oo aan ka yarayn 7 sanno oo ka ay mid tahay ugu yaraan 3 sanno oo waayo'aragnimo ah oo ku saabsan maaraynta masiibooyinka, maamulka hay'adaha ama hawlaha gargaarka.
4. In aanu ku dhicin xukun maxkamadeed oo ciqaab ah 5 tii sanno ee ugu danbeysay.
5. In ay maskax ahaan fayow yihiin.
6. In ay ku sifoobaan xilkas, akhlaaq wanaag, toosnaan isla markaana leeyihiin sifo dhexdhexaadnimo, karti iyo daacadnimo.

Qodobka 14aad

Shuruudaha Xil ka Qaadista Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku Xigeenka Hay'adda

Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeenka waxa xilka lagaga qaadi karaa shuruudahan:

1. Marka uu xilka gudan kari waayo karti darro awgeed, taas oo fadhiid ka dhigta hawshii hay'adda.
2. Marka uu ku kaco anshax xumo, xatooyo, musuqmaasuq I.W.M.
3. Marka uu is casilaad qoraal ah u gudbiyo Madaxweynaha, Madaxweynuhuna ka aqballo.
4. Marka uu galo dembi ciqaabtiisu gaadhayso ugu yaraan (3) sanno.
5. Marka uu gudan kari waayo xilkiisa, sababo caafimaad darro ama bukaan maskaxeed awgeed oo ay caddeeyeen guddi dhakhaatiir ah oo ka diiwaangashan Komishanka Mihnadlayaasha Caafimaadka Qaranka.

Qodobka 15aad

Xilka & Waajibaadka Guddoomiyaha Hay'adda

Xilka iyo waajibaadka Guddoomiyaha Hay'adda waxa ka mid ah: -

- 1) Socodsiinta, hagista iyo maamulidda dhammaan hawlaha hay'addu u xil saaran tahay.
- 2) Maamulka iyo maaraynta hawlmaalmeedka hay'adda.
- 3) Metelaadda iyo ku hadalka magaca hay'adda.
- 4) Soo jeedinta miisaaniyadda hay'adda, markuu la tashado masuuliyiinta waaxyaha.





- 5) Go'aaminta iyo soo bandhigidda dhammaan qorshayaasha iyo barnaamijyada horumarineed, xisaabxidhyada iyo dhammaan wixii kale ee la xidhiidha hawsha hay'adda.
- 6) Saxeexidda heshiisyada iyo dhukumentiyada rasmiga ah iyo kuwa maaliyadeed ee hay'adda.
- 7) Qorshaynta, kormeerka iyo dabagalka waajibaadka hay'adda, si waafaqsan siyaasadda xukuumadda iyo qorshaha hay'adda.
- 8) Isku dubbaridka qorshayaasha kala duwan ee lagu hormarinaayo hawlaha hay'adda.
- 9) U qorista waraaqaha rasmiga ah deeq bixiyayaasha caalamiga ah, hay'adaha caalamiga ah iyo dawladda soomaliland, taas oo uu kaga codsanaayo kaalmo, si looga hor tago aafada saamaysay bulshada.
- 10) Guddoomidda kaalmooyinka laga helo gudaha iyo dibadda isagoo metelaya hay'adda.
- 11) Xaqiijinta in kaalmadii si sax ah loo diwaan geliyay, isla markaana gaadhay dadkii u baahnaa ee ku noolaa goobaha ay aafadu saamaysay.
- 12) Isagoo kaashanaya shaqaalihiiisa iyo xafiisyada kale ee ay khusayso waa inuu diyaariyaa qorshayaal iyo istraatijiyaad lagula dagaalamo masiibooyinka.
- 13) Diyaarinta qorshe sannadeed iyo miisaaniyadda hay'adda.
- 14) Diyaarinta warbixin xilliyeed iyo sannadeed khusaysa hay'adda.
- 15) Dabagalka iyo kormeeridda kaalmadii la qaybiyay iyo saamaynta ay ku yeelaytay bulshada deggen goobtaas.
- 16) La'saxeexidda jeeggaga iyo foojarada agaasimaha maamulka iyo maaliyadda.
- 17) Inuu u fududeeyo hantidhawraha inuu baadhitaan ku sameeyo dhukumentiga hay'adda.
- 18) U kala caddaynta shaqooyinka ay qabanayaan waaxyaha kala duwan ee hay'adda.

Qodobka 16aad

Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiye ku xigeenka Hay'adda

Xilka iyo waajibadka guddoomiye ku xigeenka hay'adda waxa ka mid ah:

- 1) Gudashada xilka Guddoomiyaha Hay'adda mar kasta oo uu Guddoomiyuhu maqan yahay & marka ay bannaanaato jagada Guddoomiyaha Hay'addu.
- 2) Wuxuu ka caawinayaa guddoomiyaha habaynta hawlaha kala duwan ee shaqo.
- 3) Gudashada waajibaadka kale ee guddoomiyuhu u igmado.





Qodobka 17aad

Shaqaalaha Hay'adda

- 1) Hay'addu waxay si waafaqsan Xeerka Shaqaalaha Dawladda u shaqaalayn kartaa saraakiisha iyo shaqaalaha kale ee ay u aragto in ay lagamamaarmaan u yihiin fulinta shaqooyinkeeda ku xusan xeerkan iyo xeeridaamiyayaasha ka farcama.
- 2) Hay'addu waxay yeelan kartaa khubaro la talineed waddani ah ama ajnabi ah, si loo xaqiijiyo in hay'addu hesho hawl wadeenno khibrad u leh hawlaha maaraynta masiibooyinka, iyadoo xilka iyo muddada shaqadooda lagu faahfahinayo heshiis leh muddo cayiman oo ay hay'addu la gasho.

QAYBTA 4AAD

MAALIYADDA IYO HAB XISAABEEDKA

Qodobka 18aad

Miisaaniyadda Hay'adda

Miisaaniyadda Hay'addu waxay ka koobnaanaysaa;

1. Ha'yaddu, si lamid ah ha'ayadda kale ee Qaranka ee madaxa bannaan waxay yeelanaysaa miisaaniyad u gaar ah.
2. Ha'yaddu waxay u raacaysaa diyaarinta miisaaniyaddeeda si waafaqsan Xeerarka iyo Halbeegyada Maamulka Maaliyadda ee Qaranka u dejisan.
3. Hay'addu waxay xaq u yeelanaysaa inay hesho deeqo, kaalmooyin iyo tabarucyo sharci ah oo ka iman kara gudaha iyo dibadda, iyadoo shardi laga dhigayo in aanay ka hor imanayn xeerarka iyo shuruucda dalka.

Qodobka 19aad

Xisaabaadka iyo Hantidhawrka Hay'adda

- 1) Hay'addu waxay ku dhaqmaysaa hab xisaabeedka ay dejisay Wasaaradda Maaliyaddu ee waafaqsan sida ay dhigayaan Xeerarka Maamulka Maaliyadda Qaranku,
- 2) Hay'addu waxay diyaarinaysaa diiwaanada iyo buugaagta xisaabeedyada oo si hufan loogu diiwaangeliyo, looguna keydiyo xog xisaabeedyada iyo hantida hay'adda.
- 3) Hay'addu waxay siinaysaa hay'adaha ay khusayso xisaab xidhada iyo warbixinaha kale ee maaliyadeed eee khuseeya hawlaha hay'adda.
- 4- Xisaabaadka hay'adda waxa si sannadle ah u baadhi doona hantidhawrka





- 5- Waxa kale oo Hantidhawr lagu samayn karaa xisaabaadka ha'ayadda xilliyadda kale ee ay soo baxdo baahi hantidhawr.

Qodobka 20aad

Warbixinaha

1. Hay'addu waxa kale oo ay warbixin sannadle ah u gudbinaysaa Madaxweynaha iyada oo ku sheegaysa wixii u qabsoomay, waxa u qorsheeysan, tallaabooyinka muhiimka ah ee ay qaadeen iyo wixii kale ee Madaxwaynuhu amro. Warbixinta faqradda sare ee qodobkan lagu sheegay waa in ay waafaqsantahay qorshaha guud ee Hay'adda ee la dagaalanka Masiibooyinka iyo waxqabadkeeda ku wajaahan qorshaha.
2. Hay'addu warbixin sannadle ah waxay u gudbinaysaa Golaha Wakiillada gaar ahaan guddida ay wada shaqaynta leeyihiin guddida Kheyraadka dabiiciga ah, deegaanka iyo waxsoosaarka.
3. Hay'addu waxay soo saari kartaa warbixinno gaar ah, marka ay timaaddo masiibo qaran ama xaalad degdeg ah, kuwaas oo lagu wargelinaayo hay'adaha ay khusayso iyo guud ahaan shacabka.
4. Waxa kale oo warbixinnada qodobkan lagu sheegay ka mid noqon karta masiibooyinka taagan iyo kuwa kale ee la filan karo in ay dhici karaan iyo tallaabooyinka u diyaargarawga iyo ka hortagga.

QAYBTA 5AAD

QODOBBO KALA DUWAN

Qodobka 21aad

Ciqaabaha iyo Ganaaxyada

1. Qof kasta ama hay'ad kasta oo ku xadgudubta xeerkan waxa laga qaadi doonaa tallaabo sharci ah oo waafaqsan xeerarka dalka.
2. Xadgudubyada waxa ka mid noqon kara: musuqmaasuq, kutakrifalka keydka raashinka Qaranka, faafin xog khaldan ama xog sir ah iyo diidmo ku timaadda fulinta amarro sharci ah inta lagu jiro xaalad masiibo.
3. Ciqaabtu waxay noqon kartaa ganaax, xabsi ama labadaba, iyadoo lagu salaynayo culayska dembiga, waxaana loo raacayaa Xeerka Ciqaabta Guud iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah.

Qodabka 22aad

Soo Saaridda Xeernidaamiyayaasha

Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Kaydka Raashinka Qaranku waxay awood u leedahay in ay soo saarto xeernidaamiyaasha, hagayaasha, habraacyayda iyo siyaasadaha lagu nidaaminayo, isla markaana lagu





Qodobka 23aad

Tirtirid ama laalid (Repealing)

1. Xeerakani wuxuu tirtirayaa Xeerka Abuuridda Hay'ada Cilmibaadhista Deegaanka iyo u Diyaargarawga Aafooyinka (NERAD) Xeer Lr.35/200
2. Xeerkani meesha kama saaraayo xeeraka kale ee dhaqangalaka ah ee dalka ee xidhiidhka la leh masiibooyinka dabiiciga ah ama kuwa kale ee dad sameega ah.
3. Haddii qodob ama qodobbo ka mid ah xeerar kale ee faqrada sare lagu sheegay iyo qodob ama qodobbo ka mid ah xeerkani ay iska hor yimaadaan, waxa mudnaanta yeelanaaya qodobka ama qodobadda xeerkan.

Qodabka 24aad

Dhaqangalka Xeerka

Xeerkani waxa uu dhaqan galayaa marka golyaasha sharci dejintu ansixiyaan Madaxweynuhuna saxeexo, laguna soo saaro faaginta rasmiga ah.

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee G/Wakiilada JSL



Md. Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon)
Guddoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

